



CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooyinka iyadoo u hagaajineyso helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

SOOMAALIYA: SAHAY CAAFIMAAD OO GAARTAY GAALKACYO SI LOOGU CAAWIYO DHAAWACA



©Peter Lick/ICRC

Isbitaalka Jaamacadda iyo Xarunta Caafimaadka Gaalkacyo dhibaato weyn ayaa soo gaartay sababta oo ah waxay u dhowaayeen qaraxyada.

caafimaad ICRC bixisay waxay ka mid ahaayeen 15 bareele, 2 xirmo ee daawada dhaawaca hubka oo ku jirto daawo iyo qalab si loogu fuliyo qaliin iyo in lagu daweyo bukaano gaaraya ilaa 100 oo la dhigay isbitaalka, ICRC waxay kaloo bixisay kareemooyin si loogu daweyo qubashada, iyo qalab xaaladda tararrka wax ka tara. Intaa waxaa dheer, ICRC Waxay bixisay teendhooyin loogu talagalay bukaanada isbitaalka la seexinaayo si isbitaalka uu u wato hawl- maalmeedkiisa.

Peter Lick, ergay ka tirsan ICRC oo maalmo yar ka dib qaraxyada booqday goobta wuxuu xaaladda ku sifeeyey mid aad looga walaaco. "Tani waa musiibo aad u daran", waxaa yiri Peter. "Bukaanada, shaqaalaha caafimaadka iyo dhismayaasha caafimaadka waa in laga ilaaliya rabshadaha inta lagu guda jiro iska-horimaadka hubeysan".


Nayroobi (ICRC) - Ilaa iyo 80 bukaan oo dhaawacyo qaba ayaa u baahnaayeen gargaar caafimaad ka dib labadii qarax ka dhacay magaalada Gaalkacyo 21-kii Agoosto. Isbitaalka Jaamacadda iyo Xarunta Caafimaadka Gaalkacyo labaduba waxay jawaab ka bixiyeen xaaladda deg degga ah ayagoo daaweyey dadka dhaawaca ah.

Labada qarax waxay ka dhaceen meel ku dhow illinka golaha deegaanka. Qaraxa labaad wuxuu dhacay goor dadku ay ku mashquulsanyihiin caawinta dhaawacyada. Ugu yaraan 25 qof ayaa ku dhinteen weerarada.

Afar ka mid ah shaqaalaha Isbitaalka Jaamacadda Gaalkacyo oo ku yaalo meel ku dhow halka ay ka dhacayeen qaraxyada ayaa ku dhaawacameen. Waxaa intaas dheer, qaraxyadu waxay dhismaha

isbitaalka u geysteen bur bur weyn waxayna carqaladeeyeen hawlihiisa. In badan bukaanada hore u jifay isbitaalka iyo inta badan dhibbanayaasha qaraxyada ayaa waxay noqotay in loo wareejiyo Xarunta Caafimaadka Gaalkacyo.

Guddiga Caalamiga Laanqayrta Cas (ICRC) waxay si deg deg ah Isbitaalka Jaamacadda iyo Xarunta Caafimaadka Gaalkacyo labaduba ugu dirtay sahay caafimaad si loogu caawiyo kuwa dhaawacmay. Sahayda



Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo www.blogs.icrc.org/somalia/so

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org